



# SIDA AAD UU ISTICMAALI KARTO ADEEGYADEENA

[rtd-denver.com](http://rtd-denver.com) | 303.299.6000 | [customercare@rtd-denver.com](mailto:customercare@rtd-denver.com)



Maadaama aanu bixinno adeegyada gaadiidka dadweynaha ee aagga magaalada Denver, RTD waxay bulshada ku xirtaa basaska, tareenada, Helida-Gadiidka-a (adeegyada dadka naafada ah), basaska xaafadaha sida FlexRide, iyo kuwo kale oo badan. U ogolow RTD inay kaa caawiso buuxinta baahiyahaaga gaadiidka!

## BARNAAMIJYADA LEH QIIME DHIMISTA LACAGAHA LAGU RAACO GAADIIDKA

Adiga iyo qoyskaaga waxaad u qalmi kartaan qiime dhimis. Qiime dhimista lacagaha lagu raaco gadiidka ayaa waxaa heli karaa:



Dadka dakhligooda  
uu hooseeyo



Dadka da'da ah  
(ee ka wayn 65+)



Dadka naafada ah



Dhallinyarada  
(da'dooda ay tahay 19 iyo  
wixii ka yar)\*

**Baro wax badan oo ku saabsan u qalmitaanka iyo codsashada qiime dhimista lacagaha lagu raaco gadiidka adigoo booqanaaya [rtd-denver.com/discount-fares!](http://rtd-denver.com/discount-fares)**

\* Dhallinyarada da'doodu tahay 19 jir iyo ka yar waxay si bilaash ah ugu safri karaan gaadiidka, mahadsanid barnaamijka Zero Fare for Youth.

## SIDA AAD UU IIBSAN KARTO TIGIDHADA IYO RASIIDYADA

Haddii aad ku safreysa baas ama tareen, wey fududahay inaad iibsato tigidhadaada RTD. Xulo lacagta gadiidka lagu raaco ee buuxineysa baahiyahaaga (saddex-sac, Maalintii, ama Bishii), sidaasina waxaad ku raacaysa gaadiidkaaga.

### Halka aad ka Iibsan karto Tigidhada

- Mashiinada tigidhada laga iibsado eek u yaalla dhamaan xarumaha tareenada
- Shirkadda basaska (waa haddii aad isticmaaleysa lacag caddaan ah, bixii oo keliya qadarka lacagta ee tigidhkaas uu joogo)
- Barta [rtdonlinestore.com](http://rtdonlinestore.com)
- Goobaha lagu iibiyo tigidhada RTD
- Dukaamada King Soopers iyo Safeway ee qaybta ka ah barnaamijka RTD

### RTD ee Telefoonkaaga Gacanta

Meesha ugu fudud ee aad ka iibsan karto tigidhadaada waa telefoonkaaga gacanta. Ku qabo telefoonkaaga koodka QR ee dhanka midig si aad uu soo dejisato abblikeeshanka **RTD ee MyRide** ee telefoonada IOS iyo Android.



**Isticmaal adeegyada RTD, qorshee safarkaaga, iyo wax kale oo badan adigoo  
booqanaaya [rtd-denver.com](http://rtd-denver.com).**



## QORSHEE SAFARKAAGA

Isticmaal agabka **Safarka Xiga** ee RTD ([app.rtd-denver.com/nextride](http://app.rtd-denver.com/nextride)) si aad uu qorsheysato safarkaaga laga billaabo bilowga ilaa dhamaadka, eeg halka uu maraayo baskaaga ama tareenkaaga, ama eeg in uu daahsan yahay amaba wakhti ku habboon lagu baajiyay.

## RAAC BASKA

### Talooyin waxtar leh

- Goor hore tag goobta aad baska ka raacd.
- Markuu bas yimaado, eeg calaamadda dhijitaalka ah ee ku taalla xagga hore ee baska si aad u hubiso in uu aadayo waddada iyo meesha aad u baahan tahay!
- Raac baska oo ku bixi qadarka lacagta ee uu tigidhkaas joogo, tigidh sax ah, kaarka MyRide ama tigidhka gacanta.
- Haddii aad isticmaalayo kaarka MyRide ama tigidhka gacanta, ku qabo qalabka hubinaaya in uu sax yahay.
- Markaad u dhawaato goobta aad u socotay, jiid xaringga jaalaha ah, ama taabo badhanka si aad u codsato in lagu joojiyo baska.
- Ka bax alaabka dambe marka ay suurtogal tahay.



## KU BOOD TAREENKA

### Talooyin waxtar leh

- Tag xarunta tareenka. Eeg calaamadaha dhijitaalka ah ama Safarka Xiga ee tareenka xiga.
- Ka iibso tigidh goobta tigidhada lagu iibyo, ama qaado tigidhka gacanta ama sii diyaarso tigidhka inta aadan raacin tareenka.
- Ka eeg mishiinnada cas ee "V" in tigidhkaaga daabacan uu yahay mid sax ah, kaarka MyRide saxayaasha madow iyo qalinka ah, ama ka shaqeysii tigidhkaaga gacanta. Uma baahnid inaad xaqiijiso kuwa aad ka iibsatay mashiinka iibinta tigidhada.
- Istaag gadaasha khadka jaalaha ah si aad u sugto tareenka.
- Daawo calaamada dhijitaalka ah ama dhegasyo ogaysiinta maqalka ah si aad u ogaato marka aad uu dhowdahay goobta aad u socotay.



## KU NABADQAB BASASKA IYO TAREENADA



Haddaad wax aragto, wax dheh. Ku qabo koodka QR ee bidix si aad u soo dejisato RTD abblikeshanka **Daawashada Goobta** la sii maro si aad uu soo sheegto wixii la xiriira welwelka amni iyo badqabka ee ku saabsan agagaarka ama nidaamka RTD. Waxa kale oo aad wici kartaa 303.299.2911 ama ku dir qoraal 303.424.9100 si aad uu soo sheegto wixii walaac amni ah. Booqo [rtd-denver.com/transitwatch](http://rtd-denver.com/transitwatch) si aad wax badan uga barato.

## GARGAARKA IYO CAWIMAADA LUQADDA

Ka wac Daryeelka Macmiilka 303.299.6000 wixii su'aalo ah ee ku saabsan RTD. Adeegyada turjumaadda waxaa si lacag la'an ah loogu heli karaa in ka badan 200 luqadood. Si aad u doorato Isbaanish, taabo 2. Luqadaha kale oo dhan, taabo 8, ka dibna u sheeg wakiilka luqadda aad ku hadasho oo ha dhigin telefoonka inta lagu xirinayo turjubaan.



Eeg adeegyada RTD, oo qorshee safarkaaga, iyo wax kale oo badan oo booqo [rtd-denver.com](http://rtd-denver.com).

